



# DAWLADA DEEGAANKA SOOMAALIDA ITOOBIYA x

*Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka, Dhismaha  
iyo Warshadaha*

Awaamiirta Moodeelka ah ee Lagu Fulinayo  
Diiwaangelinta Qurba-joogta Itoobiyaanka ah iyo Kuwa u Dhashay  
Itoobiyaanka ee ku nool Dibedaha ee Guryaha ka doonaya  
Barnaamujka Iskaashatada Guryaha

*Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka,  
Dhismaha iyo warshadaha  
Maskaram, 2007*

Xafiiska Hor. Magaalooyinka, Dhismaha iyo warshadaha





# DAWLADA DEEGAANKA SOOMAALIDA ITOOBIYA

*Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka, Dhismaha  
iyo Warshadaha*

Awaamiirta Moodeelka ah ee Lagu Fulinayo  
Diiwaangelinta Qurba-joogta Itoobiyaanka ah iyo Kuwa u Dhashay  
Itoobiyaanka ee ku nool Dibedaha ee Guryaha ka doonaya  
Barnaamujka Iskaashatada Guryaha

*Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka,  
Dhismaha iyo warshadaha  
Maskaram, 2007*


Xafiiska Hor. Magaalooyinka, Dhismaha iyo warshadaha



## Hordhac

Dawlada J.D.F.I, iyada oo dejisay siyaasad ku wejahan qurba-joogta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee ku nool wadamada dibedaha, taas oo ay u dejisay qaab u suurtogelin kara inay ka qaybgalka looga baahan yahay ka qaataan dhaqdhaqaqyada dhinac kastaba leh ee ka socda dalkooda, wakhtigan xaadirka ahna dawladu ku gudo-jirto dhaqangelinteeda. Hadaba, sida uu dhigayo Qod, 6.5(2) ee siyaasadaasi, maadaama oo si cad siyaasadaas loogu qeexay in la fidiyo nidaam salka ku haya daraasad sugar oo suurto gelisa in dadka qurba-joogta ahi iyaga oo iskaashato ahaan ah iyo iyaga oo calaa shakhsii ahba guud ahaan deegaankeena gaar ahaana afarta is-maamul magaalo sida Jig-jiga, Godey, Dhagaxbuur iyo Qabridahar ay intaba ka heli karaan guryaha hoyga oo u dheelitiran nidaamka tashiilka iyo sidoo kale, sida ku qeexan jihada baaxada isteraatijiyadeed ee haqab-tirida guryaha hoyga ee heer dal, ayaa:-

- *MAADAAMA OO* ay lagama maarmaan tahay in la abuuro xaalad ku haboon sidii ay qurba-joogta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee ku nool wadamada dunidu iyaga oo dhisanaya iskaashatooyin si buuxda uga faa'iideystaan Barnaamujka Horumarinta guryaha hoyga ee dalkooda;
- *MAADAAMA OO* ay lagama maarmaan noqotay in la fidiyo nidaamka halbeega oo cad, qaab-dhismeed iyo nidaamka tashiilka iyo nidaam-shaqeed firfircoon oo ka marag kacaya nidaamkaas oo suuro geliya sidii qurba-joogta Itoobiyaanka iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee ku nool wadamada dibeduuhu iyaga oo wadamada ay joogaan ku kaydsanaya lacagaha adag, isla markaasna loo sahlayo sidii ay kaqayb-gal baraarug leh uga qaadan lahaayeen Barnaamujka Horumarinta guryaha ee dalkooda, una noqon lahaayeen mulkiilayaal yeesha guryo ay xaqle ka yihiin oo dalkooda hooyo uga dhisan, sidoo kalana, kasokow xoojinta xidhiidhka wanaagsan ee ay la yeelanayaan dalkooda hooyo, in taas la barbar wado sidii ay kaalinta kaga aaddan uga qaadan lahaayeen koboca dhaqaalaha dalkooda;



- Xafiiska, Horumarinta Magaaloooyinka, Dhismaha iyo Warshadahu isga oo nidaam isku dhafan oo isla jaan-qaadaya la abuuray Xafiiska Arrimaha Dibeda, Bangiga Ganacsiga ee Itoobiya iyo Hay'adaha ay khusayso hawsha Dhismaha iskaashatooyinka, ayuu si wakhtigan deegaankeena gaar ahaan afarta is-maamul magaalo ee Jig-jiga, Godey, Dhagax-buur iyo Qabridahar laga dhaqangelinayo nidaamka Diiwaangelinta muwaadiniinta Itoobiyaanka iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee qurba-joogta ah ee iyagu doonaya inay iyaga oo qaab iskaashato uga faa'iideysanaya Barnaamujka Horumarinta guryaha qaab iskaashato ugaga qayb qaadanaya barnaamujkan, isla markaasna raba inay dalkooda hooyo ku yeeshaan guryo ay iyagu iska leeyihiin, ay lagama maarmaan noqotay inuu nidaamka diiwaangelintoodu u noqdo mid yeeshaa miisaan isu dhaw-dhaw, cadcadaan iyo hanaan caddaalaad ku salaysan;

Ayaa Xafiiska Horumarinta Magaaloooyinka, Dhismaha iyo Warshaduhu ee heer deegaan, iyada oo uu ka duulayo awoodaha sharci ee lagu siiyey Qod, 10 iyo 25 ee Bayaanka Tirsigiisu yahay, ay soo saartay awaamiirtan qeexan ee fulineed ee Moodeelka ah.



## Qaybta Koowaad

### Guud ahaan

#### 1. Ciwaan gaaban

Awaamiirtan waxaa loogu yeedhi karaa: "*Awaamiirta Moodeelka ah ee fulinta Diiwaangelinta Itoobiyaanka iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee ku nool dibedaha ee iyagu doonaya Guryaha hoyga ah*".

#### 2. Micne

1. "***Qurba-joogta Itoobiyaanka ah***" waxaa loola jeedaa Itoobiyaanka iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee iyagu ku nool wadamada dibedaha;;
2. "***Xawaalad***", waxaa loola jeedaa tabaha isu gudbinta lacagaha ee laga adeegsado dhinaca Bankiyada ka jira dibadaha iyo dalka gudhiisa ama hay'adaha kale ee kala gudbiya lacagaha.
3. "***Diplomatic pouch***" waxa loola jeedaa Shandada /baagga/ lagu qaado dukumentiyada iyo xogaha loo adeegsan karo hal shaqo oo khaas ah oo keliya isla markaasna waafaqsan axdigii Jineefa ee lagu fasaxay hawshaas;
4. "***Misiyoon***" Waxaa loola jeedaa Embassiga, Xafiiska Qunsuliyada ama Ergayga ee ay Dawladfa JDFI ka furatay ama ka furan doonto wadamada kala duwan ee caalamka;
5. "***Iskaashatada Guryaha Hoyga ee horay u soo jirtay***" waxaa loola jeedaa Iskaashatada ay wadajirka u samaystaan Itoobiyaanka, kuwa u dhashay Itoobiyaanka iyo qurba-joogta dib ugu soo laabatay dalkooda ee iyagu ku nool dibadaha, kuwaas oo iskaashato ahaan account xidhan ugu shubta lacag loogu dhiso guryo, waana kuwa shahaadada Diiwaangelinta aqoonsiga sharci ee iskaashato ka hela hay'adaha qaabilسان Dhismaha iskaashatooyinka, waana iskaashatooyinka qaabkaas u dhisan ee aan wali la wareegin dhulkii ay ka dhisan lahaayeen guryaha;



6. "*Iskaashatooyinka Guryaha ee Cusub*" waxaa loola jeedaa iskaashatooyinka cusub ee ay dhistaan Itoobiyaanka, kuwa u dhashay Itoobiyaanka iyo qurba-joogta ku soo laabatay dalkeeda ee ku nool dibadaha ee iyagu doonaya ama isu diiwangeliyey inay dhistaan noocyada guryaha ee look ala yaqaan Appartments iyo Town-houses, isla markaasna is diiwaangeliyey iskaashato ahaan laga bilaabo markii la ansixiyey ee la dhaqangeliyey awaamiirtan fulineed ee tirsigeedu yahay \_\_\_\_\_/2006;
7. "*Isdiiwaangeliye shakhs ah*" waxaa loola jeedaa shakhsiga Itoobiyaanka ah, u dhashay Itoobiyaanka ama qurba-jooga dalkiisa ku soo laabtay ah ee isagu iskii shakhsii ahaan isugu diiwaangeliya Dhismaha Appartment ama Town-house, isla markaasna ku dhaqma nidaamka guryaha wadajirka loogaga faa'iideysto;
8. "*Cadaynta Wakiilashada*" waxaa loola jeedaa cadaymaha iyo heshiisyada qaab waafaqan xeerarka iyo shuruucda hay'adaha uu sharcigu u awood siiyey ee dalka gudihiiisa iyo dibadiisa looga soo qaato sida;/ Diiwaangelinta heshiisyada -Notary Public/ iyo kuwa laga soo qaato Misyonada iyo Wasaarada Arrimaha Dibeda, iyo sidoo kale wakiilashada uu si buuxda u cadeeyey Xafiiska ansixinta heshiisyada iyo wakiilashada;
9. "*Bankiga Ganacsiga*" waxaa loola jeedaa Bankiga Ganacsiga Itoobiya;
10. "*Enterprise*" waxaa loola jeedaa hay'ada Horumarinta dawlada ee loo aasaasay inay fuliso hawlaho Horumarinta guryaha hoyga ee Addis Ababa ama mida ay dawladaha deegaanada u aasaaseen shaqadaasoo kale ama mustaqbal kaba ugu aasaasan doonaan;
11. "*Diplomat*" waxaa loola jeedaa qofka shaqaalaha Itoobiyaanka ah ee ay Wasaarada Arrimaha Dibada ama Xafiisyada kale ee dawladeed ku meeleyaan inuu uga soo shaqeeyo Misyonada xidhiidhka dibadaha ee dawlada;
12. "*Shaqaalaha aan Diplomacyga ahayn*" waxaa loola jeedaa , shaqaalaha Itoobiyaanka ah ee aan isagu ahayn diplomacyga ee ay Wasaarada Arrimaha Dibada ama Xafiisyada kale ee dawladeed ku meeleyaan inuu uga soo shaqeeyo Misyonada xidhiidhka dibadaha ee dawlada;
13. "*Qurba-jooga soo laabtay*" waxaa loola jeedaa muwaadinka Itoobiyaanka ah, ama u dhashay Itoobiyaanka mudo laba sanno ah ama ka badan joogay dalka kedib markii uu



sababo kala duwan awgood dalkiisa ugu soo laabtay, isla markaasna ka hawlgalay qaybaha kala duwan ee shaqooyinka ;

14. "**Dhismaha Iskaashatooyinka**" waxaa loola jeedaa geedi-socodka muhiimka ah ee Dhismaha iskaashatooyinka ee xafiiska horumarinta magaaloooyinka, dhismaha iyo warshadaha iyo hay'adaha la midka ah ee ay magaaloooyinka u dhisteen inay fuliyaan Dhismaha iskaashatooyinka;
15. "**Town-House**" waxaa loola jeedaa Dhismaha dabaqa heerkiisu yahay G+1 ama G+2 ee isagu leh daaraad yar oo xoogaa ah iyo irrid laga galo isla markaasna dhismihiisu ku naban yahay Dhismaha kale ee dhinacyada kaga xiga ee deriskiisa ah;
16. "**Appartment**" waxa loola jeedaa Dhismaha dabaqa heerkiisu yahay G+4 iyo wixii ka sarreeya, isla markaasna lagu dhisayo qaab waafaqsan hab-isticmaalka Balaanka dhulka magaalada, waana dhismayaasha hoyga gaarka loo leeyahay oo loo wada dhisto si wadajir ah isla markaasna hoy buuxa oo dhamaystiran loo kala qaato lahaansho shakhsi.

### 3. Xadka Fulineed

- 1) Awaamiirtan Moodeelka ahi waxay fulitaan sharci ku leedahay muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka, Diblomaasiyiinta u shaqaalaysan Misiyoonada JDFI iyo Shaqaalaha aan diblomaasiyiinta ahayn ee ka hawl gala xidhiidhka dibedaha ee aan iyagu fursad u helin inay ka faa'iideystaan guryaha lagu dhiso xidhiidhinta dawlada iyo kuwa Barnaamujka Horumarinta guryaha, isla markaasna iyagu isu diiwaangeliyey isuna dhisaya Iskaashato ahaan sidii ay u heli lahaayeen guryaha hoyga ah, sidoo kalana iyaga oo isu dhisay iskaashato ahaan doonaya inay dhisaan noocyada dhismayaasha ee (Town House) iyo (Appartment);
- 2) Awaamiirtan muunada ahi, kedib marka si buuxda loo ansixiyo ayaa waxaa si buuxda looga dhaqangelinaya Maamulada Magaaloooyinka Jig-jiga, Godey, Dhagaxbuur iyo Qabridahar. Hadaba, kedib marka si buuxda loo ansixiyo Awaamiirta, ayay muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa Itoobiyaanka u dhashay ee dibadaha ku nooli deegaanada ay u dhasheen amaase magaalada ay iyagu ka xushaan deegaanada kale iyo Magaaloooyinka dalka uga dooranayaan in laga diiwaangeliyo, kedibna marka ay deegaanada iyo ismaamulada Magaaloooyinka



dalku si buuxda awaamiirtan oo ay waafajiyeen xaaladahooda gaarka ah uga dejistaan awaamiir ay iyagu leeyihiiin, ayay fulinayaan Diiwaangelinta iyo dhul u diyaarinta qurba-joogta ka soo dalbatay in deegaanka/magaaladooda laga diiwaangeliyo.

#### **4. Ujeedada Awaamiirtan Fulineed ee Moodeelka ah**

1. Waa in mad-madowga laga saaro, si cadna loo qeexo nidaamka iyo shuruudaha la waafajinaya Diiwaangelinta loo samaynayo muwaadiniinta qurba-joogta ah ee Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee iyagu ku nool dibadaha doonayana inay ka faa'iideystaan Barnaamujka Horumarinta guryaha ee dalkooda;
2. Waa in la fidiyo nidaam shaqo oo si cad u qeexaya nidaamka wada-shaqayneed ee wakhtigan la wado Diiwaangelinta u dhaxaynaya qaybaha iyagu doorka ku leh, isla markaasna la kelifo inay iyaga oo si cad u fahansan xilalka iyo waajibaadyadooda awaamiirtan si buuxda u dhaqangeliyan.

#### **5. Xeerarka /Principles/**

1. Waa in la abuuro xaalado u haboon sidii muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee ku nool wadamada dibeduhu kaalintooda uga qaataan horumarka dalkooda ee laga wado dhinaca Horumarinta guryaha.
2. Iyada oo la raacayo nidaamka Diiwaangelinta, tashiilka iyo qaab-dhismeed aan wax mugdi ahi ku jirin isla markaasna xawli-socod leh, ayaa la suurto gelinayaa in xogaha kala duwani noqdaan kuwo si buuxda u wada gaadha ka faa'iideystayaashooda /isticmaalayaashooda.
3. Wawa iyadana la suurto gelinayaa in qaybaha kale ee iyaguna doorka ku leh qaab isku-dubaridan oo ka qaybgelin leh dhinacooda uga gacan siiyan/taageeraan dadaalada ay dawladu ugu jirto sidii loo taakulayn lahaa muwaadiniinta Itoobiyaanka ah, kuwa u dhashay Itoobiyaanka iyo Soo laabtayaasha /Diaspora Returnees).



## **Qaybta Labaad**

### **Shuruudaha Diiwaangelinta**

#### **6. Kuwa shakhsii ahaan isugu diiwaangelinaya Guryaha Hoyga**

Muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee ku nool dibeduuhu kedib marka ay shakhsii ahaan isu diiwaangeliyaan ee ay dhistaan Iskaashatada Dhismaha Guryaha hoyga, isla markaasna ay doonayaan inay fuliyaan dhismayaasha (Town House) iyo (Appartment), iyaga oo buuxinaya shuruudahan hoos ku xusan ayay is diiwaangelin karaan:-

1. Koobiga Baasaaboorkiisa saxda ah iyo Fasaxa degenaanshaha wadanka uu ku nool yahay ama koobiga aqoonsigiisa cadaynaya inuu xubin ka yahay bulshada Itoobiyaanka ah ee wadankaas uu ku nool yahay ka dhisan;
2. Hadii uu yahay mid isagu haysta dhalashada wadan kale, inuu keeno koobiga aqoonsigiisa cadaynaya inuu u dhashay Itoobiyaan;
3. Nuqulka Rasmiga ah (Original) ee shahaadada Nikaaxa (Guurka);
4. Laba sawir oo cabirkoodu yahay kan Baasaaboorka;
5. Foomka loo diyaariyey u Diiwaangelinta hawshan iyo heshiiska uu galay oo uu soo sexeexay soona dhaweeoyo;
6. La-diiwaangeliyayaasha waxaa waajib ku ah in wakhtigii kasta ee ay dawladu u baahato in laga dhigo faraha (fingerprint) shuruud la'aan ku aqbalaan farahoodana dhigaan halka ay khusayso;
7. Guriga uu isagu xushay ee uu isu diiwaangeliyey dhismihiisa oo uu guud ahaan kharashka uu ku kacayo lacag adag ku bixiyo sida uu dhigayo qodobkan qodobhoosaadkiisa 8, kedibna keeno nuqulka /copy/ rasiidhka cadaynaya inuu



accountiga xisaabaadka ET-Birr ee looga furayo dalka gudihiiisa ku soo xereeyey iyada oo Birr ah;

8. Inuu yahay mid nooca dfhismaha guriga ee uu isagu doortay kharashka uu ku kacayo 50% wakhtigan is-diiwaangelinta ku soo shuba Account uu ka furto Laanta Bankiga Ganacsiga Itoobiya ee ka furan wadanka uu joogo, kedibna marka loo diyaariyo dhulka ee lagu wareejiyo Iskaashatadiisa Dhismaha Guryaha hoygana uu gebi ahaan wada bixiyo 50% hadhay, qaabkaasna ugu diyaar garooba inuu qaato fasaxa Dhismaha, isla mar ahaantaasna keeni kara rasiidhka lacag-bixinta oo cadaynaya inuu ku bixiyey lacag adag (Hard Currency) isla markaasna ku soo shubay Accountiga ET-Birr ee looga furay dalka gudihiiisa;
9. Qofka waxaa qof dhismay loo qaadanayaa laga bilaabo maalinta uu 50% bixiyo kharashka uu ku kacayo Dhismaha uu xushay isla markaasna is diiwaangeliyo;
10. Inuusan ahayn qof hada kahor ha noqoto magaca xaaskiisa ama magaca xaaskiisa/saygeeda Magaaloooyinka dalka gudihiiisa kaga haystay guri hoy ah ama boos dhul oo laga dhisan karo guri, hadii uu ka haystay laf ahaantedana uusan ahayn qof u wareejiyey dhinac saddexaad.

## **7. Kuwa Guryaha doonaya ee isu diiwaangeliya Iskaashato ahaan**

Qof kastao guri doon ah oo jecel inuu barnaamujkan ka qayb qaato, waxaa looga baahan yahay:-

1. Inuusan ahayn qof hada kahor ha noqoto magaca xaaskiisa ama magaca xaaskiisa/saygeeda Magaaloooyinka dalka gudihiiisa kaga haystay guri hoy ah ama boos dhul oo laga dhisan karo guri, hadii uu ka haystay laf ahaantedana uusan ahayn qof u wareejiyey dhinac saddexaad.



2. Inuu noqdo qof diyaaru ah inuu balan qaado inuusan horay uga faa'iideysan barnaamujyada kale ee dhinaca Horumarinta guryaha ay dawladu ka hirgelisay ama isu diiwaan gelinin inuu ka faa'iideysto, isla markaasna xataa hadii uu hore isugu diiwaangeliyey lafteeeda diyaar u noqdo inuu kansalo isdiiwaangeliisii hore ama farahaba ka qaado.
3. Iskaashatada Horumarinta guryaha waxaa iskaashato ahaan si sharci ah loogu aqoonsan karaa/diiwaangelin karaa marka ay dhamaan xubnaha ay ka kooban tahay si buuxda u wada bixiyaan 50% qiimaha lagu qiyasay kharashka uu ku kacayo dhismuhu oo keliya.
4. Iskaashatada waxaa loo aqoonsan karaa mid aasaasantay laga bilaabo maalinta qiimaha guud ee Dhismaha 50% ay bixiyaan isla markaasna si buuxda isu diiwaangeliyan oo keliya.
5. Habka loo diiwaangelinayo iskaashatooyinkii hore u diiwaangashanaana ayaa noqonaya mid ay Wasaarada Arr. Dibeda oo la kaashanaysa hay'adaha ay khusayso hawsha Dhismaha iskaashatooyinku inay kala gasho heshiis isla markaasna heshiiskaas oo qeexan lagu fuliyo diiwaanglintooda.
6. Iyada oo iskaashato kasta ay waajib ku tahay inay yeelato magac loogu yeedho, ayaa sidoo kale dhamaan xubnaha iyagu ka tirsan iskaashatooyinka loo magac bixiyey looga baahan yahay inay buuxiyaan xaashida tirsigeedu yahay 005 ee la soo hordhigi doono, hadii ay laf ahaantoodu iman kari waayaana waxaa u buuxin kara dad ay iyagu soo wakiishaan.
7. Xubnaha Iskaashatada waxaa looga baahan yahay inay wakhtigan ay dawladu uga baahato in laga qaado faraha (Fingerprint) bilaa shuruud ku ogolaadaan in laga qaado faraha, taasna diyaar u noqdaan.



8. Iyada oo iskaashatooyinka Dhismaha guryaha ee doonaya inay guryo ka dhisaan meelo ka baxsan magaaloooyinka (darafyada) looga baahan yahay inay dhismayaalkooda u samaystaan naqshado iyaga u gaar ah, ayaa naqshadaas ay samaystaani waxay ansax noqonaysaa marka ay ansixiyaan xubnaha ay khusayso hawsha naqshada Dhismaha ee heer deegaan.
  9. Muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee waliba qurbaajooga dib ugu soo laabtay dalkiisa ee dibedaha ku nool ee iyagu doonaya inay isu habeeyaan iskaashato ahaan guryana ka dhisaan Magaaloooyinka deegaanada ee ka baxsan deegaankeena, iyada oo laga dalbayo inay deegaanka iyo magaalada ay doonayaan xushaan, soo gudbiyaan xulashadooda, loona samaynayo diyaargarowga u haboon ayaa qaabkaas dalabkooda loo qabilayaa looguna fulinayaa.
  10. Iyada oo kuwa doonaya guryaha hoyga ee iska diiwaangelinaya Magaaloooyinka deegaanada, diiwaangelintooda la waafajinayo barnaamujkaas, ayaa hawshoodu waxay noqonaysaa in lagu fuliyo Awaamiirta fulineed ee ay deegaanada iyaga oo ka duulaya awaamiirtan Moodeelka ah iskood ugu diyaarsadaan fulinta hawshan.
- 8. Diblomaasiyiinta JDFI ee ka hawlgala Misiyoonada iyo Shaqaalaha aan Diblomaasiyiinta ahayn**

- 1) Kasokow shuruudaha ku qexan Awaamiirta qaab-dhismeedka iskaashatooyinka Dhismaha guryaha hoyga ee ay Wasaarada Horumarinta Magaaloooyinka, guryaha iyo Dhismaha ee JDFI u dejisay Diplomacyiinta ka shaqeeya misiyoonada iyo shaqaalaha aan iyagu ahayn Diplomacyiinta, waxaa kaloo u dheer:-
  - a) Koobiga Baasaaboorkooda Itoobiya iyo
  - b) Warqada Cadaynta ah ee ay soo siiso Wasaarada Arr. Dibedu

Kuwaas oo looga baahan yahay inay soo buuxiyaan dhamaan shuruudahaas loo dhigayo, kedibna iyaga oo isku soo diiwaangelinaya wakhtigan loo cayimay



is-diiwaangelinta qurba-joogta, isla markaasna 50% qiimaha guud ee guriga ay dhismihiisa xushaan ku soo bixinaya lacagta Birrta, inay u soo gudbiyaan Agaasinka Guud ee Maaraynta Cududa Shaqaale ee Wasaarada Arrimaha Dibeda.

- 2) Diplomacyiinta iyo shaqaalaha aan diplomacyiinta ahayn ee ka shaqeeya misiyoonada ee iyaga ay sababo kala duwan awgood u dhaaftay fursadii Diiwaangelinta ee Barnaamujka Horumarinta guryaha ee 40/60, hadii ay doonayaan inay ka faa'iideystaan fursadii guryaha kirada jaban ee 40/60 ee ay horay u helaan muwaadiniinta dalka ku nool, iyaga oo awoodi kara inay buuxiyaan foomka loogu tala galay diiwaangelinta iyo Nidaamka (Formality) ee Bankiga Ganacsiga Itoobiya, ayay isu diiwaangelin karaan qaabka lagu faahfaahiyey qodobka 17 ee awaamiirtan.
- 3) Kuwa iyagu doonaya inay dhistaan guryo iyaga oo iska diiwaangelinaya Geedisocodka muhiimka ah ee Dhismaha iskaashatooyinka ee xafiiska horumarinta magaaloooyinka, dhismaha iyo warshadaha ee heer deegaan, ayaa sidoo kale, deegaanada ka baxsan deegaankeena laga diiwaangelinaya hay'adaha u qaabilsan Dhismaha iskaashatooyinka.



## **Qaybta Saddexaad**

### **Habka loo Furto Xisaabta Bankiga (Account), Nooca Guryaha iyo Qiimaha Diiwaangelinta**

#### **9. Habka loo furto Xisaabta Bankiga (Account)**

- 1) Bankiga ganacsiga Itoobiya waxa keliya uu bixinayaad adeegga uu xisaabaadka (Accounts) ugu furayo iskaashatooyinka iyo shakhsiyaadka isu diiwaangeliyey shaqada Dhismaha guryaha hoyga;
- 2) Iyada oo Hay'ada ay khusayso ee Dhismaha Iskaashatooyinku furayso Accountiga wadaaga ah (Pull Account), ayaa iyada oo mid kasta oo ka mid ah iskaashatooyinkan loo furayo diiwaan xisaabeed (Subsidiary Ledger), ayaa la suuro gelinayaad inay kahor Diiwaangelinta xisaabtaas ku soo shubaan;
- 3) Bankiga Ganacsiga Itoobiyana waxa uu Hay'ada Dhisida Iskaashatooyinka iyo Xafiiska Arrimaha Dibedaba u gudbinayaad cadayn muujinaysa caddadka lacageed ee ay iskaashato kastaba leedahay ;
- 4) Qurba-joogta doonaysa in loo dhiso gurigu iyada oo aan lagu darin waxyaabaha lagu qeexay awaamiirtan qodobkeeda 8<sup>aad</sup>, ayaa looga baahan yahay inay guriga ay doonayaan in loo dhiso qiimaha guud ee uu ku kacayo ku bixiyaan lacag adag;
- 5) Is-diiwaangeliyayaashu waxay kharashka ku bixinayaan lacagaha uu dalku wax ku kala iibsado;
- 6) Is-diiwaangeliyayaashu waxay awoodi karaan in wixii ay hada kahor lacago ku soo kaydsadeen accountiga Qurba-joogta ee Bankiga Ganacsiga Itoobiya loogu wareejiyo accountiga bankiga ee iskaashatadooda Dhismaha guryaha;



- 7) Iskaashatooyinkii horay u soo jiray waxaa iyaga looga baahan yahay in lacagahooda ugu jira accountiga xidhan, hadii uu ka furnaa banki kale iyaga oo ula soo wareegaya dhinaca Bankiga Ganacsiga Itoobiya uga furaan accountiga lacagta Birrta ee dalka;
- 8) Kuwa ku nool wadamada dibeda ee iyagu isu diiwaangeliyey shakhsii ahaan ama iskaashato ahaanba wakhtigan ay doonayaan inay furtaan accountiga bankiga waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan shuruudahan:-
- a) Waxa uu keenayaa koobiga baasaaboorka iyo cadaynta fasaxa degenaanshaha dalka uu joogo ama koobiga aqoonsiga kaadhkiisa xubinimada urur-bulsheedka ka dhisan wadanka uu ku nool yahay;
  - b) Hadii uu haysto dhalasho wadan kalana koobigiisa baasaboorka iyo koobiga dhalashadiisa Itoobiyaanka;
  - c) Laba sawir oo qiyaasta baasaaboorka leh
  - d) Inuu soo buuxiyo soona sexeexo foomka Diiwaangelinta iyo midka heshiiska ee loogu tala galay hawshan;
  - e) Inuu keeno rasiidhka cadaynaya inuu 50% oo ah kharashka Dhismaha nooca guriga ee uu xushay ku soo diray lacag adag, isla markaasna uu iyada oo lacagta dalka ee Birrta ah ku shubay accountiga looga furay dalka gudihiisa.
- 9) Kuwa Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee aan iyagu sababo kala duwan inta ay shakhsii ahaan u yimaadaan misiyoona JDFI isaga diiwaangeliyaan, isla markaasna doonaya inay qaab shakhsii ahaana ama iskaashato ahaanba isugu diiwaangeliyaan guryaha hoygu iyaga oo buuxinaya shuruudahan hoos ku xusan ayay diiwaangelin karaan dadka ay iyagu soo wakiishaani. Shuruudaha looga baahan yahayna:-



- a) Wakiilku Waxa uu keenaya koobiga baasaaboorka iyo cadaynta fasaxa degenaanshaha dalka uu joogo ama koobiga aqoonsiga kaadhkiisa xubnimada urur-bulsheedka ka dhisan wadanka uu ku nool yahay;
- b) Wakiilku hadii uu haysto dhalasho wadan kalana koobigiisa baasaboorka iyo koobiga dhalashadiisa Itoobiyaanka;
- c) Laba sawir oo qiyaasta baasaaboorka leh
- d) Inuu keeno rasiidhka cadaynaya inuu 50% oo ah kharashka Dhismaha nooca guriga ee uu wakiilku u xushay ku soo diray lacag adag, isla markaasna uu iyada oo lacagta dalka ee Birrta ah ku shubay accountiga looga furay dalka gudihiisa.
- e) Cadaynta uu wakiilku ku balan qaadayo in hadii xogta uu ka bixiyey wakiishuhu khalad noqoto isaga lagala xisaabtamayo, taasna uu sexeexo.
10. Qurba-joogta dib ugu soo laabtay dalka ee iyagu qaybaha ka shaqeeya qaybaha kala duwan ee maalgelineed, ganacsiga iyo qaybaha shaqo ee kala duwan, isla markaasna dalka ku noolaa laba sanno iyo wixii ka badan, marka ay buuxiyaan shuruudahan hoos ku faahfaahsan ayay furan karaan accountiga bankiga ee lacagta ETBirr.
- a) Gaar ahaan, kuwa qurba joogta ah ee u dhashay Itoobiyaanka, waxaa looga baahan yahay:-
1. Nuqulka rasmiga ah ee baasaaboorkiisa;
  2. Hadii uu yahaya mid leh dhalasho wadan kale inuu keeno nuqulka rasmiga ah ee shahaadadiisa dhalashada Itoobiyaanimada;
  3. Inuu xafiiska arrimaha dibeda ka keeno cadayn muujinaysa inuu dalka ku noolaa laba sanno iyo wixii ka badan;



4. Hadii uu ka shaqeeyo hay'adaha caalamka ee dalka gudihiisa (Hay'adaha qaaradaha, kuwa dawliga ah, kuwa aan dawliga ahayn iyo hay'adaha ama shirkadaha gaarka loo leeyahay) inuu Wasaarada arrimaha dibeda ka keeno cadayn muujinaysa in mushaarkiisa bisha ku qaato lacagta Birrta ah ee Itoobiya iyo inuu yahay canshuur bixiye;
  
5. Hadii uu dalka gudihiisa ku leeyahay hawlo kale oo uu ka helo dekhli, inuu keeni karo cadaynta muujinaysaa illo-dekhliyedkiisaas oo nuqulka rasmiga ah (original) iyo koobiba (copy) isugu jira.

b) Qurba-joogta Itoobiyaanka ah ee dalka ku soo laabtayna waxaa looga baahan yahay:-

1. Baasaaboorkiisa;
2. Cadaynta fasaxa degenaanshaha ee wadanka uu ku nool yahay;
3. Nuqulka rasmiga ah (original) iyo koobiga cadaynta muujinaysa inuusan dalka gudihiisa ku noolayn mudo laba sanno iyo wixii ka badan;
4. Hadii uu ka shaqeeyo hay'adaha caalamka ee dalka gudihiisa (Hay'adaha qaaradaha, kuwa dawliga ah, kuwa aan dawliga ahayn iyo hay'adaha ama shirkadaha gaarka loo leeyahay) inuu Wasaarada arrimaha dibeda ka keeno cadayn muujinaysa in mushaarkiisa bisha ku qaato lacagta Birrta ah ee Itoobiya iyo inuu yahay canshuur bixiye;

11. Qurba-joogta u dhalatay Itoobiyaanka ee dib ugu soo laabtay dalka ee iyagu qaybaha ka shaqeeya qaybaha kala duwan ee maalgelineed, ganacsiga iyo qaybaha shaqo ee kala duwan ee dalka gudihiisa isla markaasna dalka ku noolaa mudo ka yar laba sanno iyo kuwa qurba-joogta Itoobiyaanka ahee iyagu 2 sanno iyo wixii ka badan ku noolaa dalku iyaga oo buuxinaya shuruudaha lagu qeexay qodobka 10 ee awaamiirtan qodob-hoosaadka 10, maqradiisa (a) iyo (b), iyaga oo ku bixinaya lacag, isla markaasna furanaya accountiga Birr-ta ee Itoobiya ayay ka faa'iideysan karaan Barnaamujka.



## **10. Noocyada Guryaha la dhisayo, Balladhkooda iyo Qiimaha Guryaha**

1) Iyada oo guryaha ay qurba-joogta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay itoobiyaanku, guryaha ay dhisanayaan ee ay isugu diiwaangelinayaan shakhsii ahaan iyo iskaashato ahaantuba yihiin noocyada guryaha ee (Appartment) ah ee Jig-jiga iyo sadexda is-maamul magaalo ee kale laga dhisanayo iyo Guryaha Apartments-ka iyo Town house-ka ah ee ay ka dhisayaan deegaanada kale magaaloooyinkeeda, ayaa guryahaas ay dhisayaan baaxadooda /baladhkooda/ iyo qiimahooda guudba noqonayaa qaabkan hoos ku xusan:-

**a) Guryaha (Appartment) ah (waa G+4 iyo wixii ka badan ee laga dhisayo Addis Ababa):-**

1. Midka leh 2 hurdo oo balladhkiisuna yahay 74 K/m qiimihiisu waa Birr 532,800
2. Midka leh 3 hurdo oo balladhkiisuna yahay 100K/m qiimihiisu waa Birr 720,000
3. Midka leh 4 hurdo oo balladhkiisuna yahay 136 K/m qiimihiisu waa Birr 927,200

**b) Guryaha Town Houses ee laga dhisayo caasimada Jig-jiga ee heerkeedu yahay (G+4 iyo wixii ka badan):-**

1. Midka leh 2 hurdo oo balladhkiisuna yahay 74 K/m qiimihiisu waa Birr 424,390
2. Midka leh 3 hurdo oo balladhkiisuna yahay 100K/m qiimihiisu waa Birr 573,500
3. Midka leh 4 hurdo oo balladhkiisuna yahay 136 K/m qiimihiisu waa Birr 779,960

**c) Guryaha Town-houses (G+2) ee laga dhisayo caasimada iyo sadexda kale**

1. Midka leh 3 hurdo oo balladhkiisuna yahay 114K/m qiimihiisu waa Birr 693,120
2. Midka leh 4 hurdo oo balladhkiisuna yahay 136 K/m qiimihiisu waa Birr 779,960
- 2) Iyada oo qiimayaasha dhismaha ee kor lagu soo sheegay uu yahay qiimaha rasmiga ah ee wakhtigan xaadirka ah lagu dhiso guryaha, ayaa kuwa aan hada muuqanina halkaas laga garan karaa inuu qaab macquul ah uu uga jiri karo faraq kala duwanaansho dhinaca qlimaha ah.
- 3) Hadii iskaashatooyin ka badan 4 (Xubahooduna yihiin 48 iyo wixii ka badan) ay doonayaan inay iyaga oo samaystay midow (Union), magaalada badhtamaheeda ka



dhisaan dabaqyada aadka u dhaadheer (Higher rise), waxay noqonaysaa in iyaga la siin doono mudnaanta koowaad, loona fasaxo Dhismaha.

- 4) Guud ahaan, iyada oo iskaashatooyinka Dhismaha guryaha look ala soocay Diiwaangelinta iyo qaab-dhismeedka, gaar ahaan tirade xubnaha, noocyada guryaha, qolalka jiifka iyo dhererka Dhismaha ayaa look ala dejiyey istaandarka hoos ku faahfaahsan.

### **Faahfaahinta Dhererka Dhismayaasha, Tirada Xubnaha iyo Noocyada Guryaha**

- I. Isku-dhafka Noocyada Guryaha iyo Baaxada dhul ee ay u baahan yihin Dhismayaasha Appartments ee magaalada Addis Ababa (G+4 iyo wixii ka badan) (Kuwa cusub iyo kuwii horay u jiray oo 12 Xubnood ka kooban).

| Qaabka | Tirada Xubnaha       | Nooca Guriga   | Isku-dhafka Caddadka Guryaha ee uu yeelanayo hal Appartment | Celceliska Baaxada Dhul ee uu u baahanayo |        |          |
|--------|----------------------|--|---|---|--------|----------|
|        |                      |  |   | wD  | X m sX | mm,X H X |
| 1.     | 12<br>(1 Iskaashato) | 2 Hurdo  | 3   | 80  |        | 240      |
|        |                      |  |   |   |        |          |
|        |                      |  |   |   |        |          |
|        |                      | <b>Wadarta Guud ee Balladhka Dhulka uu u baahan yahay</b><br>s m m X |   |   | X      | a X      |
| 2.     | 12<br>(1 Iskaashato) | 3 Hurdo  | 6   | 88  |        | 528      |
|        |                      |  |   |   |        |          |
|        |                      | <b>Wadarta Guud ee Balladhka Dhulka uu u baahan yahay</b><br>s m m X |   |   | X      | aa d X   |
| 3.     | 12<br>(1 Iskaashato) | 3 Hurdo  | 8   | 88  |        | 704      |
|        |                      | <b>Wadarta Guud ee Balladhka dhulka uu u baahan yahay</b><br>s m m X |   |   | X      | a X      |

*F/Gaara:-*

1. Kuwa guryaha doonaya ee shaksi ahaan isu diiwaangelinaya waxay awoodi karaan inay iyaga oo tiradoodu tahay 12, kuna salaysan hadba wadanka ay ka yimideewn qaabkaas isu dhisaan.
2. Baaxada Dhulka ee Dhismaha ee kor lagu soo sheegay ayaa iyada oo lagu salaynayo hadba Qorshe-hagaha horumarineed ee uu maamulka magaaladu u dejiyey dhulka magaalada ayaa qiyaastiisa la yarayn karaa ama la sii kordhin karaa.



**II. Nooca Guryaha, Tirada Xubnaha iyo balladhka dhulka uu u baahan yahay Dhismaha Town-house (G+1) ee laga dhisayo Caasimada iyo magaaloooyinka kale**

| Qaabka | Nooca Guriga | Tuirada xubnaha ay yeelanayso hal iskaashato | Balladhka dhulka ee hal dhisme la siinayo oo K/Meter ah | Celceliska booska uu u baahan yahay dhismuhu oo K/Meter ahaan ah |
|--------|--------------|--|---|--|
| 1.     | 2 Hurdo      | 12   | 120   | 1,440  |
|        | 3 Hurdo      | 12   | 135   | 1,620  |
|        | 4 Hurdo      | 12   | 150   | 1,800  |

**F/gaara:-**

Hadii ay xubnaha iskaashatadu damcaan inay isu dhisaan qaab ka duwan nooca loo dhigayo caddadka jiifka guryaha, waxaa la samaynayaa inay iyaga laf ahaantoodu soo gudbiyaan naqshada nooca guriga ay doonayaan.



**Qaybta Afraad**  
**Xilka iyo Waajibaadka**

**11. Xafiiska Horumarinta Magaaloooyinka, Dhismaha iyo Warshadaha**

1. Iyada oo diyaarinaysa awaamiir fulineed oo moodeel ah oo suurto gelisa sidii qaybaha doorka ku leh Diiwaangelinta kuwa qurba-joogta Itoobiyaanka ah ee isu diiwaangelinaya qaabka iskaashatooyinka Dhismaha guryaha iyo qaabka shakhsii ahaaneed, ay u raaci lahaayeen nidaam shaqo oo isku dubaridan, ayay dabagal iyo taakulaynba u fidinaysaa habka fulinta awaamiirtaas;
2. Iyada oo kaashanaysa maamulada Magaaloooyinka ayay dabagal iyo taakulaynba u fidinaysaa sidii kuwa shakhsii ahaan isu diiwaangeliyey iyo kuwa isjkaashatada Dhismaha guryaha ku diiwaan gashan loogu diyaarin lahaa dhul ku filan, Horumarinta aasaasiga ah ee loo baahan yahay, naqshado heerkooda ( standard) ah amaase in la shaandheeyo lana ansixiyo naqshada ay iyagu iskood u keensadeen iskaashatooyinka iyo shakhsiyadku iyo sidoo kale qaab isku dubaridan iyo qaab waafaqsan isteraatiijiyada guryaha hoyga loo dhaqangeliyo;
3. Iyada oo diyaarinaysa naqshado moodeelo ah (Model Designs) oo koobaya heerarka kala duwan ee dhismayaasha Magaaloooyinka iyo hab-isticmaalka kala duwan ee dhulka, ayay u kala diraysaa Maamulada Magaaloooyinka Jig-jiga iyo sadexda is-maamul magaalo ee kale;
4. Iyada oo diyaarinaysa qaab-dhismeed moodeel ah oo lagu hoggaaminayo dhamaan qaab-socodka hawla shaqo ee bilowga ilaa dhamaystirka dhismayaasha ayay u kala diraysaa Maamulada Magaaloooyinka Jig-jiga iyo sadexda is-maamul magaalo ee kale.



## 12. Xafiiska Arrimaha Dibeda

### 1) Misiyoonaada

- a) Qurba-joogta ku sugaran wadanka loo wakiishay misiyoonaada ee iyagu guryoodoonka ah ee isu diiwaan geliyey qaab shakhsii ahaaneed iyo qaab iskaashato, ayuu fahan buuxa ka siinayaan Awaamiirta loo diyaariyey fulinta hawshan;
- b) Isaga oo kuwa shakhsii ahaan iyo iskaashato ahaanba isugu diiwaangeliyey Barnaamujka guryaha si cad u fahansiiyaya ugana dhaadhicinaya maalmaha Diiwaangelinta, goobta Diiwaangelinta iyo shuruudaha looga baahan yahay ee ku qeexan Awaamiirta fulineed, ayuu qabanayaan shaqo uu ku soo dhamaystirayo qaab-dhismeedyadooda;
- c) Isaga oo inta ku filaan karta ka diyaarinaya foomamka ay Wasaarada arrimaha dibadu ugu soo dirtay inay soo buuxiyaan kuwa shakhsii ahaanta isu diiwaangeliyey iyo kuwa isu diiwaangeliyey Barnaamujka iskaashatooyinka guryaha ayuu kalifayaan inay sidii loo baahnaa u soo buuxiyaan;
- d) Isaga oo si taxadar leh isugu soo habaynaya dukumentiyada kuwa shakhsii ahaantooda isu soo diiwaangeliyey iyo kuwa isu diiwaangeliyey Barnaamujka iskaashatooyinka Dhismaha guryaha iyo sidoo kale xaashiyaha, heshiisyada iyo foomamka kala duwan ee ay Waaxda Dhismaha iskaashatooyinku u soo marisay Xafiiska arrimaha dibada ee la soo gaadhsiiyey iyo waliba xogta dhabta ah ee xubnaha iskaashatooyinka, ayuu suuro gelinayaan in dhamaan dukumentiyadaas oo uu ugu soo gudbiyo dhinaca Diplomatic Botch wakhtigan loo baahan yahay soo gaadhaan Agaasinka Guud ee Arrimaha Ka-qayb galka Qurba-joogta ee Xafiiska Arrimaha Dibeda;
- e) Waxa uu xaqijinayaan in dukumentiyada, foomamka, heshiisyada iyo xaashiyaha kala duwan ee ay laamaha ay khusayso ee Dhismaha iskaashatooyinka guryaha kala duwani ku soo ansixiyeen qaab-dhismeedka iyo nidaamyada shaqo ee iskaashatooyinka loona soo mariyey dhinaca Wasaarada arrimaha dibada, si habsami ah loo wada gaadhsiiyey jka faa'iideystayaasha iska leh;



- f) Hadii ay la soo dersaan su'aalo, cabashooyin iyo waxyaabaha u baahan ka qancinta, wakhtigan ku haboon ayuu u soo gudbinayaan Agaasinka Guud ee ka qayb-galka qurba-joogta iyo dhinaca xafiiska guud intaba;
- g) Marka aan eegno kuwa shaksi ahaanta isu diiwaangeliyeyna, inkasta oo aan iyaga looga fadhiyin wax is dhisid ah, hadana si ay habka fulinta ugu fududaato, ayuu misiyoonku is-diiwaangeliyayaasha oo u soo kala soocay koox ahaan dhinaca Wasaarada arrimaha dibada ugu soo dirayaan Agaasinka guud ee arrimaha ka qaybgalka qurba-joogta, taas oo uu ku soo klifaaqayo warqad ay ku qeexan tahay liistada is-diiwaangeliyayaashu.
- h) Waxa uu xaqijinayaan in Diiwaangelinta dadka shaksi ahaanta iyo Barnaamujka iskaashatooyinka guryaha isugu diiwaangeliyey ay waafaqsan tahay nidaamka ay qeexayso awaamiirtu loo ansixiyey oo keliya;
- i) Foomamka laga soo buuxiyey xubnaha iskaashato kasta oo cusub, xeer-hoosaadkeeda ay xubnuhu isku dhiseen iyo hadal-qoraalka fadhigii lagu doortay xubnaha hoggaamineed ee Iskaashatada ayuu ku soo lifaaqayaa warqada uu ku soo gudbinayo misiyoonku;
- j) Isaga oo xaqijinayaan in xubnaha isu soo diiwaangeliyey Iskaashatada Dhismaha guryaha ee magaalada Jig-jiga inay yihin ugu yaraan 12 xubnood iyo wixii ka sii badan, sidoo kalana kuwa isu soo diiwaangeliyey Iskaashatada Dhismaha guryaha ee 3dexda magaalee kale inaysan kayarayn 12 xubnood, waana inuu isaga oo misiyoonku diyaarinaya xeer-hoosaadka Iskaashatada Dhismaha guryaha oo moodeel ah, kana soo buuxinaya, hadal-qoraal lagu soo doorto hoggaaminta Iskaashatada, iyada oo la kala sexeexdayna la soo diro.



**2) Agaasimaha Guud ee Arrimaha ka qaybgalka qurba joogta ee Xafiiska Arrimaha Dibeda**

- a) Awaamiirta, hab-raacyada, xfoomamka, iwm... ee loo baahan yahay ayuu wakhtigan ku haboon u diraa misiyoona;
- b) Waxyaabaha u baahan in la qeexo ayuu isaga oo kaashanaya cida ay khusayso suurto geliyaa in xilliga ku haboon la gaadhsiiyo misiyoona;
- c) Isaga oo dokumentiyada qaab-dhismeedka, xeer-hoosaadka, hadal-qoraalka iyo xogaha kala duwan ee lagu dhisay iskaashatooyinka u soo diraya waaxaha ay khusayso ee Dhismaha iskaashatooyinka, ayuu arrimahaas ku samaynayaan dabagalka ku haboon;
- d) Marka ay waaxaha ay khusayso ee Dhismaha iskaashatooyinka guryuhu u soo gudbiyaan shahaadooyibnka iyo dokumentiyada kale ee aqoonsiga sharci ee la siiyey iskaashatooyinka ayuu markiiba u gudbiyaa misiyoona;
- e) Isaga oo eegaya, isla markaasna dabagal ku samaynaya xidhiihada lala wadaagayo misiyoona, bankiga ganacsiga itoobiya, hay'adaha ay khusayso ee Dhismaha iskaashatooyinka Dhismaha guryaha, ayuu ku samaynayaan dabagalka ku haboon;
- f) Isaga oo ka duulaya liistada uu u soo gudbiyey misiyoonku ayuu suurto gelinayaan in loo furo xisaabta (account) bankiga;
- g) Kuwa shaksi ahaanta isu diiwaangeliyey kahor diiwaangelintooda ayuu suurto geliyaa in iskaashato kasta magaceeda loogu furo accountiga wadaaga ah /pull account/;



- h) Isaga oo is-diiwaangeliyayaasha shakhsiyadka ah u dhisaya iskaashato ahaan, ayuu u gudbinayaa xarumaha Diiwaangelinta iyo waaxaha qaabilsan Dhismaha iskaashatooyinka;
- i) Qurba-joogta dib ugu soo laabtay dalkoodana isaga oo xaqijinaya inay buuxiyeen shuruudaha hoos ku xusan, ayuu siinayaa cadayn muujinaysa inay u qalmaan Diiwaangelinta:-
1. Koobiga baasaaboorka qur-bajooga soo laabtay;
  2. Hadii qurba-jooga soo laabtay uu yahay mid haysta dhalasho wadan kale shahaadada dhalashada ee itoobiyaanimadiisa;
  3. Nuqulka rasmiga ah ee shahaadada nikaaxa;
  4. Laba sawirka qurba-jooga soo laabtay oo cabirkoodu yahay kan sawirka baasaaboorka;
  5. Inuu soo gudbiyo foomka heshiiska iyo kan diiwaangelinta ee hawshan loo diyaariyey oo uu ku soo buuxiyey wakiilnimada soona sexeexay;
  6. Inuu keeno rasiidhka cadaynta inuu Dhismaha uu xushay qiimihiisa 50% ku soo bixiyey lacag caddaan ah isla markaasna ku soo shubay accountiga looga furay dalka gudihiisa ee lacagteenna Birrta.

### **3) Agaasimaha Guud ee Maaraynta Cududa Shaqaale ee Xafiiska Arrimaha Gudaha**

- a) Warqada uu misiyoonka u soo qoray Diplomacyinta iyo shaqaalahaa aan diplomacyinta ahayn ee ka shaqeeya misiyoonda JDFI ee iyagu isu dhisay qaabka iskaashato ama shakhsii ahaaneedba ee uu ugu soo gudbiyey waaxaha Dhismaha iskaashatooyinka oo uu ku lifaaqo xaashiyahooda Diiwaangelinta, xeer-hoosaadka ay isku dhiseen, hadal-qoraalka ay ku doorteen xubnahooda hoggaamineed, noocyada guryaha ay doonayaan ayuu u soo wada gudbinayaa waaxaha ay khusayso ee Dhismaha iskaashatooyinka;



- b) Waxa uu dabagal ku sameeyaa qaabka diyaarinta diiwaangelinta diplomacyinta iyo shaqaalaha aan diplomacyinta ahayn ee iyagu isu soo dhisay qaabka iskaashatooyinka Dhismaha guryaha iyo kuwa shakhsii ahaanta isu soo diiwaangeliyey, wuxuuna diplomacyinta iyo shaqaalaha aan diplomacyinta ahaynba Mislyoonadooda u sii mariyaa lana socodsiiyaa wixii xog ah ee iyaga looga baahan yahay;
- c) Waxa uu Bankiga Ganacsiga Itoobiya u soo gudbiyaa liistada diplomacyinta iyo shaqaalaha aan diplomacyinta ahayn ee loo furayo accountiyada bankiga.

### **13. Bankiga Ganacsiga Itoobiya**

- 1) Isaga oo raacaya liistada ay u soo gudbiyaan Xafiiska Arrimaha Dibeda iyo Xarumaha Dhismaha iskaashatooyinku ee ay ugu dalbayaan in accounts loo furo Itoobiyaanka iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee iyagu isu diiwaangeliyey iskaashatooyinka Dhismaha guryaha iyo qaabka shakhsii ahaaneedba, ayuu u furayaa accountska loo baahan yahay;
- 2) Waxa uu suurtogeliyaa in dhaqdhaqaqa xisaabta bankiga ee Iskaashatada lagu saleeyo qaabka ku qeexan heshiiska iyo xeer hoosaadka Iskaashatada;
- 3) Waxa uu Wasaarada arrimaha dibeda u gudbiyaa xogta accounts-ka ku furan magaca dadka isku soo diiwaangeliyey shakhsii ahaanta;
- 4) Isaga oo ka duulaya dalabka ay u soo gudbiso Wasaarada arrimaha dibedu ayuu furayaa accountiga wadaaga ah (pull account) ee lagu gudbiyo lacagaha dadka iyagu shakhsii ahaanta isu soo diiwaangeliyey;
- 5) Sidoo kale, isaga oo ka duulaya dalabka uu u soo gudbiyo xafiiska horumarinta magaaloooyinka, dhismaha warshedaha ee heer deegaan ayuu u furayaa accountiga laga gudbinayo lacagaha dadka isu soo diiwaangeliyey iskaashatooyinka Dhismaha guryaha.



#### **14. Waaxda Shaqo ee Dhismaha iyo fidinta Iskaashatooyinka**

- 1) Ioobiyaanka, kuwa u dhashay Itoobiyaanka iyo qurba-joogta dalkooda dib ugu soo laabtay ayuu la socodsiiinayaan xaashiyaha iyo foomamka, iyo sidoo kale Awaamiirta kala duwan ee looga baahan yahay inay buuxiyaan marka ay isu diiwaangelinayaan iskaashatooyinka Dhismaha guryaha; sidoo kalana, iyada oo wakiilanaysa Xafiiska arrimaha dibeda ayay u fududaysaa inay dhistaan iskaashatooyinkooda;
- 2) Iyada oo diyaarinaysa Awaamiirta, foomamka iyo dokumentiyada looga baahan yahay Dhismaha iskaashatooyinka guryaha oo moodeel ah, ayay suurto gelisaa sidii ay Xafiiska arrimaha dibadu ugu sii gudbin lahayn is diiwaangeliyayaasha;
- 3) Iyada oo kaashanaysa xafiiska arrimaha dibeda iyo bankiga ganacsiga itoobiya ayay suurto gelisa in accountiyada dhigaalka iyo tashiilkha loo furo kuwa iyagu buuxiyey shuruudihii looga baahnaa isla markaasna isu soo dhisay iskaashatooyinka dhismaha guryaha hoyga (hadii ay jiraan) iyo kuwii hore u dhisnaaba; sidoo kalana, waxa ay suurto gelisaa sidii kuwa iyagu dhamaystiray 50% qiimaha guryaha hoyga ee ay doonayaan isla markaasna buuxiyey shuruudaha kale loo siin lahaa shahaadada diiwaangelinta iyo aqoonsiga sharci ee ay u baahan yihiin;
- 4) Iyada oo ka duulaysa liistada faahfaahsan ee xubnaha iyo cadaynta bankiga ganacsiga ee muujinaysa kuwa iyagu dhamaystiray kharash-bixinta, ayay suurto gelisaa sidii ay iskaashatooyinka isu diiwaangeliyey dhismaha guryaha hoygu waaxaha dhismaha iskaashatooyinka ee Magaaloooyinka ay xusheen uga heli lahaayeen aqoonsiga sharci iyo shahaadooyinka diiwaangelinta;
- 5) Si iskaashatooyinka shuruudihii looga baahnaa buuxiyey ee isu diiwaangeliyey dhismaha guryaha loogu diyaariyo boosaska dhulka ee ay wax ka dhisanayaan iyo shatiga fasaxa dhismaha, ayay iyada oo u gudbinaysa xafiiska diyaarinta dhulka iyo fasaxa dhismaha ee maamulka Magaaloooyinka, u suurto gelinaysaa inay helaan fasaxa iyo dhulka ay u baahan yihiin;



- 6) Xubnaha Iskaashatooyinka ka jira dibedaha iyo kuwa xilliga diiwaangelinta dalka ku sugan ee iyagu isu diiwaangeliyey iskaashatooyinka dhismaha ayay suuro gelisaa inay iyaga oo furanaya accountiga lacagaha adag si buuxda isu diiwaangeliyaan;
- 7) Waxa ay suuro gelisaa in iskaashatooyinka dhismaha guryaha ee ay isu diiwaangeliyeen diplomacyinta iyo shaqaalaha kale ee aan diplomacyinta ahayn ee ka shaqeeya misiyoonada JDFI ee ay xogtooda oo faahfaahsan u soo gudbiyay Agaasinka Guud ee Maaraynta Cududa shaqaale ee xafiiska arrimaha dibeda iyo xogta uu u soo gudbiyey bankiga ganacsiga itoobiya ee muujinaysa inay qiimaha dhismaha guryaha ay doonayaan 50% dhamaystireen, ayay siisaa shahaadada diiwaangelinta ee aqoonsiga sharci;
- 8) Waxay Xafiiska arrimaha dibada kala wareegtaa isla markaasna habaysaa foomamka ay soo soo buuxiyeen xubnaha isu dhisay iskaashatooyinka dhismaha guryaha ee ay leeyihin Itoobiyaanka, kuwa u dhashay Itoobiyaanka iyo diplomacyinta iyo shaqaalaha aan diplomacyinta ahayn ee misiyoonada, xeer hoosaadyada ay isku dhiseen, hadal-qoraalada ay ku doorteen hoggaamintooda iyo yogaha kale ee la halmaala;
- 9) Kedib marka dhismaha guryaha loo dhamaystiro qaab waafaqsan heshiiska dhismaha, ayay iskaashatooyinka ugu wareejinaysaa qaab waafaqsan xeer hoosaadkooda;
- 10)Waxa ay abuuraysaa qaab-dhismeed isagu dabagal ku sameeya isla markaasna hoggaamiya hawsha dhismaha ee laga bilaabo bilowga dhismaha ilaa dhamaystirkiisa.



## **15. Shirkada Horumarinta Guryaha**

- 1) Isaga oo raacaya faahfaahinta diyaargarowga ee ay u soo gudbisay hay'ada dhismaha iskaashatooyinka ee muujinaysa iskaashatooyinka isu dhisay dhismaha guryaha isla markaasna la siiyey aqoonsiga sharci ayay la galaysaa heshiiska dhismaha; waxayna suurto gelisaa in dhismahooda la fuliyo, sidoo kalana guryaha shaqada dhismahooda dhamaatay ayay ku wareejisaa Iskaashatada ay khusayso;
- 2) Iyada oo si habsami ah uga duulaysa faahfaahinta habka fulinta hawsha dhismaha iyo dalabka maaliyadeed ee loo soo dalbado heerarka kala duwan ee shaqada dhismaha, ayay codsanaysaa in si tartiib-tartiib ah oo waafaqsan nidaamka fulinta hawlaha dhismaha loogu sii daayo dalabka lacagta kharashka dhismaha oo laga saarayo lacagta Iskaashatada dhismaha guryaha ugu kaydsan accountiga xidhan ee bankiga;
- 3) Iyada oo dhulka ay iskaashatooyinku ula wareegeen inay ka sameeyaan dhismaha guryaha qaab waafaqsan naqshadahooda iyo nidaamka uga qayb gelinaya qandaraaslayaasha, shirkadaha la-talinta iyo shirkadaha yaryar, isla markaasna dhismaha guryaha ku fulinaysa heerka iyo naqshada lagu heshiiyey ayay ku wareejinaysaa iskaashatooyinka ay khusayso.



oo ay soo fasaxdo cid ay maaraynteeda u wakiilato hay'ada qaabilسان dhismaha iskaashatooyinku amaase soo ogolaado hoggaanka guud ee waaxda shaqo, fasaxaasna loo qoro bankiga ganacsiga itoobiya ayaa la fasaxayaa dhaqdhaqaqa xisaabaadkooda (accounts);

- 2) Dadka iyagu shakhsı ahaanta isu diiwaangeliyeyna iyada oo uu bankigu raacayo amarka ay u soo gudbiso hay'ada iska leh shaqada dhismaha iskaashatooyinku ayuu u fududaynayaa in lacagaha ay ku shubteen accountiyada uu bankigu u furay loogu wareejiyo accountiga wadaaga ah (pull account) ee ay ku dhisan yihiin.

## 19. Dabagalka Dhismayaasha Hoyga

- 1) Guryaha loo dhisayo dadka iyagu iskaashato ahaanta isugu diiwaan geliyey dhismaha guryaha, ayaa dhismaha guryahooda waxaa fulinaysa shirkada ay dawladu u aasaastay Horumarinta guryaha;
- 2) Sidoo kale, xubnaha iyagu shakhsı ahaanta isugu diiwaangeliyey ee doonaya inay qaab iskaashi ah ku dhistaan guryaha, waxaa dhismayaashooda u fulinaysa shirkada dawladu u aasaastay horumarinta guryaha;
- 3) Wuxuu abuuraa qaab-dhismeed taageero siiya geedi-socodka shaqada Dhismaha, siideyn taalibka lacagaha shaqada iyo nidaamka dabagalka tayada; isaga oo raacaya awaamiirtan ayuu u dejinayaa awaamiir faahfaahsan;
- 4) Ilamaa iyo inta la dhamaystirayo shaqada dhismayaasha, lalana kala wareegayo cida dabagalka samaynaysaa waxay noqonaysaa hay'ada iska leh shaqada Dhismaha iyo fidinta iskaashatooyinka;
- 5) Guryaha lagu dhisayo iskaashato ahaanta waxaa lala kala wareegayaa marka ay shaqadoodu dhamaato 100%.



## **20. Habka loola kala wareego guryaha iyo sida mudnaanta loo kala siinayo**

- 1) Itoobiyaanka iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee hada kahor iyagu u dhisnaa iskaashato ahaan, hadii ay markale isugu diiwaan geliyaan qaab waafaqsan awaamiirtan, waxaa mudnaanta hore la siinayaas is-diiwaangeliyayaasha cusub;
- 2) Dhinaca la kala wareegga guryaha dhismahoodu dhamaadayna iyada oo noqonaysa hawl lagu fulinayo qaab waafaqsan heshiiska dhismaha ee lala galay hay'ada dhismaha dhisaysa, ayaa ku wareejinta guriga ee xubin kasta oo ka tirsan iskaashatada la waafajinayaas qaabka loola wareegi karo ee ku qeexan xeer hoosaadku iskaashatada;
- 3) Dadka iyagu guri doonka ah ee isu diiwaangeliyey shakhsii ahaantase iyada oo marka hore dhismaha guryaha si wadajir ah loogu wada dhisayo, ayaa marka ay noqoto ku wareejinta xubin kasta guriga, la waafajinayaas noocii guriga ee uu horaantiiba isu diiwaangeliyey, iyada oo taas la raacayana loo qori tuurayaa oo bakhtiyaa nasiib loo sameeyey lagu kala siinayaas;
- 4) Hadii tirada iskaashatooyinka iyagu buuxiyey shuruuda hore ee is-diiwaangeliyey, isla markaasna dhamaystiray bixinta 50%, lana siiyey aqoonsigu ay ka badato dhulka loo diyaariyey inay wax ka dhistaan, waxaa la suuro gelinayaas in qaabka dhulkaas loo siinayo iskaashatooyinku noqdo qori-tuur (Bakhtiyaa-nasiib) lagu sameeyo meel ay goobjoog ka yihii wakiilada iskaashatooyinku;
- 5) Iskaashatooyinka sida ku xusan qodobkan, qodob-hoosaadkiisa (4) bakhtiyaa-nasiibka ku kala qaatay dhulka, hadii dhulku noqdo mid ku kala yaala goobo kala duwan oo Magaalada gudeheeda ah, kala doorashadooda waxaa lagu astaynayaas qaab bakhtiyaa-nasiib ah.

## **21. Ka tirtirida Barnaamujka {Cancellation}**

- 1) Kuwa isu diiwaangeliyey shakhsii ahaan iyo iskaashata midkii uu doonaba ha ahaadee cidii lagu helo inay is siiwaangelisay iyada oo aan buuxinin shuruudaha ku



qeexan awaamiirta, kasokow ka tirtirida laga tirtirayo liistada barnaamujka, waxaa u sii dheer in lagula xisaabtami karo sharciga khuseeya xaaladiisa;

- 2) Inkasta oo ay jirto xaalada lagu qeexay qodobkan, qodob-hoosaadkiisa (1) ee sare, hadii ay dhacdo in hal xubin oo ka mid ah iskaashatadu uusan buuxinaynin shuruudaha laga doonayo, waxa la samaynayaa in iyada oo isaga shakhs ahaantiisa looga talaabo qaadanayo in qaab waafaqsan xeer hoosaadku ay u sii shaqaysanayso iskaashatadu.

## **22. Xaalada dib loogu celin karo dhigaalka**

Kuwa shakhs ahaanta isugu diiwaan geliyey guryaha iyo kuwa ku diiwaangashan Barnaamujka iskaashatooyinka dhimsha guryaha, marka laga tirtiro liistada guri doonayaasha ee la go'aamiyo in loo celiyo kharashkoodii, lacagta shakhsiga ama iskaashatadaba la siinayaa iyada oo noqonaysa mid sarifka lagu siinayaa yahay Birrta Ethiopia, ayaa qaab waafaqsan heshiiskii dhigaalka iyo xeer hoosaadka loo celinayaan iyada oo loo raacinayo faa'iidadii dulsaar ee uu helayay.

## **23. Reebanaanta (Mamnuucid)**

- 1) Dhamaan waxyabaha lagu mamnuucay Awaamiirta qaab-dhismeedka iskaashatooyinka guryaha ee ay ansixisay Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka, Dhismaha iyo Wersheduhu waxay fulitaan sharci iyo dhaqangalba ku leeyihiiin awaamiirtan fulineed.
- 2) Waxa reebban in muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay Itoobiyaanka ee ku nool dibedaha lagu diiwaan geliyo wax ka baxsan shuruudaha ku qeexan Awaamiirta qaab-dhismeedka ee ay Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka, Dhismaha iyo Wersheduhu u ansixisay Dhismaha Iskaashatooyinka Guryaha.



## **24. Ganaax**

Cid kasta oo lagu helo inay xad-gudubtay waxyabaha sharcigu xaaraantinimeeyey, isla markaasna la helo iyada oo isu diiwaangelisay qaab ka baxsan shuruudaha ku qeexan awaamiirtan Moodeelka ah ee habka fulineed, iskuna dayda inay aan waafaqsanayn isu diiwaangeliso ama is-diiwaangeliye kasta oo isaga oo keenay cadayn ay ka wadato dhinac kale oo saddexaad , iskuna diiwaangelisa ha noqdo is-diiwaangeliyaha ama wakiilkiisa, waxaa lagu abaalmarinaya cizaabiisa oo waafaqsan xeerka cizaabta itoobiya.

## **25. Dib u habaynta Awaamiirtan Moodeelka ah ee fulineed**

Marka loo baahdo in awaamiirtan fulineed dib loo habeeyo, waxaa awood u leh inay dib u habayso ama wax ka bedesho hay'ada soo saartay.

*Xafiiska Horumarinta Magaaloooyinka,  
Dhismaha iyo Warshadaha*



Sawirka

**Lifaaqa Koowaad**

Waa foomka cadaynta rabitaanka isu Diiwaangelinta Barnaamujka Horumarinta guryaha hoyga ee noocyada Dhismaha ee Appartment iyo Town-house ee laga buuxinayo muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay itoobiyaan iyo qurba-joogta dib ugu soo laabatay dalkooda ee ku nool wadamada dibedaha:-

**1. Xaalada Codsadaha:-**

1.1. Magaca \_\_\_\_\_ Magaca Aabaha \_\_\_\_\_ Magaca Awowga \_\_\_\_\_  
 Jinsiga \_\_\_\_\_ Da'da \_\_\_\_\_ Qowmiyada \_\_\_\_\_  
 Jinsiyadiisa \_\_\_\_\_ Lambarka Baasaaboorka \_\_\_\_\_

1.2. Magaca Hooyada Codsadaha \_\_\_\_\_ Magaca Aabaha Hooyada \_\_\_\_\_  
 Magaca Awowga Hooyada \_\_\_\_\_

**1.3. Goobta Degenaanshaha**

- Wadanka \_\_\_\_\_ Magaalada \_\_\_\_\_
- S.Boosta \_\_\_\_\_ FAX \_\_\_\_\_
- Telefoonka \_\_\_\_\_ E-Mail: \_\_\_\_\_

**1.4. Xaalada Guurka**

Guuraday/tay  aan Guursanin  La Furay/Furay  Dhintay/matay

1.5. Hadii uu guursaday/satay magaca sayga/orida \_\_\_\_\_ Magaca Aabaha \_\_\_\_\_  
 Magaca Awowga \_\_\_\_\_

**2. Nooca Guriga uu doonaya/nayso**

2.1. Hadii uu yahay Appartmenta (Dhisme fooq oo wadaag ah/la wada leeyayah)

Midka leh 2 jiif  Midka leh 3 Jiif  Midka leh 4 Jiif

**2.2. Hadii uu yahay Town-House:-**

Midka 3 Jiif leh  Midka 4 Jiif leh

**3. Xaalada Dekhligiisa:**

- 3.1. Cadadka Dekhli-bileedka Codsadaha oo Birr ahaan ah \_\_\_\_\_ Illaha \_\_\_\_\_  
 3.2. Dekhliga Saygeeda/Ooridiisa oo Birr ahaan ah \_\_\_\_\_ Illaha \_\_\_\_\_  
 3.3. Wadarta Guud ee Dekhligooda Tiro ahaan Birr \_\_\_\_\_ Xuruuf ahaan \_\_\_\_\_

**4. Xogta Wakiilka:**

4.1. Magaca Wakiilka oo buuxa \_\_\_\_\_

4.2. Halka uu degen yahay wakiilku:

- Deegaanka \_\_\_\_\_ Magaalada \_\_\_\_\_
- Gobolka?Waax-magaaleedka \_\_\_\_\_ Degmada \_\_\_\_\_
- Qabaleega \_\_\_\_\_ Guri Lr. \_\_\_\_\_



• Telefoonka Guriga \_\_\_\_\_ Mobile \_\_\_\_\_

**5. Lacagta looga baahan yahay Diiwaangelinta ee uu dhigayo Bankiga Ganacsiga Itoobiya:**

5.1. Ugu horayn caddadka yar ee lacageed ee Birr ahaan uu ku dhigayo Accountiga xidhan oo Tiro ahaan ah \_\_\_\_\_ Xuruuf ahaan / \_\_\_\_\_ /

5.2. Lambarka xisaabta accountiga xidhan ee dhigaalka \_\_\_\_\_ Laanta \_\_\_\_\_

**6. Qaabka uu ku bixinayo xisaabta iyo dariiqada uu ku Fulinayo qiimaha gurigiisa uu xushay:**

6.1. Kharashka oo uu bixiyo hal mar 100% Labada Jeer min 50%

**7. Aniga oo ah codsadaha magaciisu hoos ku xusan yahay, waxaan cadaynayaa:-**

7.1. Inaan hada kahor barnamujyadii Horumarinta guryaha ee ay dawladu fulisay marnaba iska diiwaangelin;

7.2. Inaan magaalada aan xushay in guriga la iiga dhiso ku lahayn wax guri ah oo ku qoran magacayga iyo magaca xaaskayga/saygayga toona, inaan ku lahayn boos dhul oo aan guri hoy ah ka dhisan karo iyo inaan hada kahor guri aan lahaa qaab iibin ama siin ah toona ugu wareejin dhinac kale oo saddexaad, iyo inaan hada kahor haba yaraatee barnamujyada Horumarinta guryaha ee dawladu fidisay aanan ka faa'iideysan;

7.3. Inaan wakhtigii Diiwaangelinta buuxiyey shuruuda la iiga baahnaa ee ahayd inaan qiimaha guriga aan xushay 50% ku bixiyey lacag adag, taas oo aan ku soo shubay accounti xidhan, baaqiga kale ee 50% inaan iyadana dhigi doono bankiga kedib marka la ii diyaariyo dhulka ee la isiiyo fasaxa Dhismaha guriga;

7.4. Inaan raali ka ahay kuna qanacsanahay qaabka sharciga waafaqsan ee loo maaraynayo guriga hoyga ee aan ka qaadanayo guryaha wadaaga ah ee naloo dhisay;

7.5. In hadii cadaynta iyo xogta aan ku bixiyey foomkan codsigu noqdaan beer abuurasho uu si buuxda u burayo heshiiskii diiwaangelintaydu, gurigana aan ku wareejinayo cidii ay khusayso ama aan ku qanacsanahay in la iga qaado lacag leaze-ka ah oo aad u badan ganaaxeedana wadata;

7.6. Inaan diyaar u ahay mar kasta oo la iiga baahdo inaan dhigo farahayga iyo wixii kale ee shuruud ah ee mustaqbalka la I weydiiyaba inaan buuxiyo;

7.7. Inaan si buuxda u wakiishay cida iyadu loo xulsaaray inay fuliso dabagalka iyo fulinta hawsha Dhismaha guriga, iyo inaan diyaar u ahay hadii xogtan aan buuxiyey ay been abuur noqoto in sharciga la igula xisaabtamo, aniga oo dhamaan arrimahaas ku wada qanacsana aan buuxiyey foomkan sexeexaygana ku xaqijiyey.

Magaca Codsadaha oo buuxa \_\_\_\_\_

Sexeexiisa \_\_\_\_\_

Taariikhda \_\_\_\_\_

**F/Gaar ah:-** Foomkani waa foomka ay soo buuxiso cid kasta oo isu diiwaanglisay qaab shakhsii ahaan ah ama wakiilkeedu, lana soo gudbiyo isaga oo sexeexan.



Sawirka

**Lifaaqa Labaad**

Waa codsiga xubnimada Iskaashatada Dhismaha Guryaha ee laga buuxiyo muwaadiniinta Itoobiyaanka ah iyo kuwa u dhashay itoobiyaan iyo qurba-joogta dib ugu soo laabatay dalkooda ee ku nool wadamada dibedaha:-

**1. Magaca Iskaashatada:** *Iskaashatada Saamileyda Dhismaha Guryaha Hoyga ee \_\_\_\_\_*  
 \_\_\_\_\_.

**2. Xaalada Codsadaha:-**

2.1. Magaca \_\_\_\_\_ Magaca Aabaha \_\_\_\_\_ Magaca Awowga \_\_\_\_\_  
 Jinsiga \_\_\_\_\_ Da'da \_\_\_\_\_ Qowmiyada \_\_\_\_\_  
 Jinsiyadiisa \_\_\_\_\_ Lambarka Baasaaboorka \_\_\_\_\_

2.2. Magaca Hooyada Codsadaha \_\_\_\_\_ Magaca Aabaha Hooyada \_\_\_\_\_  
 Magaca Awowga Hooyada \_\_\_\_\_

2.3. Goobta Degenaanshaha

2.3.1. Wadanka \_\_\_\_\_

2.3.2. Magaalada \_\_\_\_\_

2.4. Xaalada Guurka  
 Guuraday/tay  aan Guursanin  La Furay/Furay  Dhintay/matay

2.5. Hadii uu guursaday/satay magaca sayga/oorida \_\_\_\_\_ Magaca Aabaha \_\_\_\_\_  
 Magaca Awowga \_\_\_\_\_

**3. Nooca Guriga uu doonaya/nayso**

3.1. Hadii uu yahay Appartmenta (Dhisme fooq oo wadaag ah/la wada leeyahay)

Midka leh 2 jiif  Midka leh 3 Jiif  Midka leh 4 Jiif

3.2. Hadii uu yahay Town-House:-

Midka 3 Jiif leh  Midka 4 Jiif leh

**4. Xogta Wakiilka:**

4.1. Magaca Wakiilka oo buuxa \_\_\_\_\_

4.2. Halka uu degen yahay wakiilku:

- Deegaanka \_\_\_\_\_ Magaalada \_\_\_\_\_
- Gobolka?Waax-magaaleedka \_\_\_\_\_ Degmada \_\_\_\_\_
- Qabaleega \_\_\_\_\_ Guri Lr. \_\_\_\_\_
- Telefoonka Guriga \_\_\_\_\_ Mobile \_\_\_\_\_

**5. Aniga oo ah codsadaha magaciisu hoos ku xusan yahay, waxaan cadaynayaa:-**

- 5.1. Inaan hada kahor barnamujyadii Horumarinta guryaha ee ay dawladu fulisay marnaba iska diiwaangelin;
- 5.2. Inaan magaalada aan xushay in guriga la iiga dhiso ku lahayn wax guri ah oo ku qoran magacayga iyo magaca xaaskayga/saygayga toona, inaan ku lahayn boos dhul oo aan guri hoy ah ka dhisan karo iyo inaan hada kahor guri aan lahaa qaab iibin ama siin ah toona ugu wareejin dhinac kale oo saddexaad, iyo inaan hada kahor haba yaraatee barnamujyada Horumarinta guryaha ee dawladu fidisay aanan ka faa'iideysan;
- 5.3. Inaan wakhtigii Diiwaangelinta buuxiyey shuruuda la iiga baahnaa ee ahayd inaan qiimaha guriga aan xushay 50% ku bixiyey lacag adag, taas oo aan ku soo shubay accounti xidhan, baaqiga kale ee 50% inaan iyadana dhigi doono bankiga kedib marka la ii diyaariyo dhulka ee la isiiyo fasaxa Dhismaha guriga;
- 5.4. Inaan raali ka ahay kuna qanacsanahay qaabka sharciga waafaqsan ee loo maaraynayo guriga hoyga ee aan ka qaadanayo guryaha wadaaga ah ee naloo dhisay;
- 5.5. In hadii cadaynta iyo xogta aan ku bixiyey foomkan codsigu noqdaan beer abuurasho uu si buuxda u burayo heshiiskii diiwaangelintaydu, gurigana aan ku wareejinayo cidii ay khusayso ama aan ku qanacsanahay in la iga qaado lacag leaze-ka ah oo aad u badan ganaaxeedana wadata;
- 5.6. Inaan diyaar u ahay mar kasta oo la iiga baahdo inaan dhigo farahayga iyo wixii kale ee shuruud ah ee mustaqbalka la I weydiiyaba inaan buuxiyo;
- 5.7. Sida lagu qeexay qodobka 1 ee kor ku xusana, maadaama oo aan sida xubnaha kale ee Iskaashatada aan wadaagno u buuxiyey dhamaan wixii shuruudo ahaa ee la iiga baahnaa, aniga oo ku qanacsan bayaanka iyo awaamiirtana rabitaankayga ku ogolaadan inaan laiskaashatoobo xubnaha kale, aaya waxaan Iskaashatada ka codsanayaa inay iga ogolaato codsigaygan xubnimada, sidoo kale, waxaan si buuxda u wakiishay cida iyadu loo xulsaaray inay fuliso dabagalka iyo fulinta hawsha Dhismaha guriga, iyo inaan diyaar u ahay hadii xogtan aan buuxiyey ay been abuur noqoto in sharciga la igula xisaabtamo, aniga oo dhamaan arrimahaas ku wada qanacsana aan buuxiyey foomkan sexeexaygana ku xaqijiyey.

**Magaca Codsadaha oo buuxa** \_\_\_\_\_

**Sexeexiisa** \_\_\_\_\_

**Taariikhda** \_\_\_\_\_

**F/Gaar ah:-** Foomkani waa foomka ay soo buuxiso cid kasta oo isu diiwaangelisay xubinimo iskaashato ama wakiilka iyada metelaya soona gudbiso isaga oo sexeexan.

